

Somaliska för första klass

Text och bilder är hämtade ur den klassiska somaliska läseboken för första klass. Texturvalet är särskilt anpassat till studiet av somaliska som främmande språk.





Akhri sheekadan

Caasho iyo Faadumo

Ma Caashaa?



Maya. Waa Faadumo.






Ma Foadumaa ?



Maya. Waa Caasho.

Ma Caashaa?



Maya. Waa bisad.



Caasho iyo Faadumo,



Faadumo, Caasho iyo bisad.



Isku aaddi



Ma Faadumaa ?



Ma Caashaa?



Ma Caashaa?



Ma Faadumaa ?

Fiiri magacaaga.


Haa

Maya




Qor magacaaga.

Cutubka 2 aad: Qoyska Faadumo



Akhri sheekadan



Magacaa?



Qoyska Faadumo

Fiiри sawirradan. Waa Faadumo qoyskeeda.



Kuwani waa
awoowahey iyo
ayeeyadey.



Kuwani waa
awoowahey iyo
ayeeyadey.



Kuwani waa
hooyadey
iyo aabbahey.



Kuwani waa
walaalkey
iyo walaashey.

Isku aaddi

Kani waa kuma?
Tani waa tuma?



Kani waa Faadumo walaalkeed.



Tani waa Faadumo ayeeydeed.



Tani waa Faadumo walaasheed.



Kani waa Faadumo awoowaheed.

Sawir oo qor erayga



O_ _ l



i _

Isku aaddi

walaalkey iyo
aabbahey iyo
ayeeyadey iyo

hooyadey
awoowahey
walaashey



l



c




i




a

Hooyadaa magaceed?
Aabbaaha magaciis?


Cutubka 3aad




Cutubka 3 aad: Guriga Faadumo




Ma arki kartaa Faadumo?
Kani waa gurigoodii.
Sawir gurigaaga.



Qor xarafka



Guriga gudihiisa




Maxaad ku arki kartaa sawirka?

Waxyaalahan wax ka mid ah ma ku haysataa
gurigiinna?


Maxaa loo isticmaalaa?

Isku aaddi

sariir



xaaqin



saxan



baaldi



gambar




miis



Qor haa ama maya.



1. Kani ma gambar baa?



2. Kani ma saxan baa?



3. Kani ma xaaqin baa?



4. Kani ma miis baa?

Qor xarafka

d d d d

ido

doolli





Qor xarafka

g g g g

gogol

gal cag






Qor haa ama maya.

1. Doolligu ma ku hoos jiraa miiska?
2. Doolligu ma ku dhex jiraa baaldiga?
3. Bisaddu ma miiskey kor saaran tahay?
4. Bisaddu ma u dhow dahay doolliga?

Sawir doolli kor saaran miis.

Sawir bisad ku hoos jirta gambar.




Qor xarafka

a a a a

calal

Doolli iyo bisad




Doolligu waxa uu ku nool yahay meel u dhow guriga Faadumo. Adigu ma arki kartaa?




Waxa uu galay baaldiga dhexdiisa.




Waxa uu galay miiska hoostiisa.




Doolligu waxa uu kor fuulay miiska.



Bisaddu waxa ay gaadaysaa doolliga.



Bisaddu waxa ay ku boodeysaa miiska.



Doolligu waxa uu ka boodayaa miiska.




Fiiri. Waa maxay kani?



"Aaway xaaqinkaygii?" "Bax". Waxaa tiri hooyo.

Isku aaddi



Doolligu waxa uu ku dhex jiraa baaldiga.



Baaldigu waxa uu hoos yaal miiska.



Gabadhu waxa ay u dhow dahay gambarka.





Wiilku waxa uu ku kor fadhiyaa sariirta.

Qor xarafka

q q q q

aqal

qaaddo



Qor xarafka

n n n n

nin iyo naag




Maxaa uu
samaynayaa Xasan?



Xasan wax buu akhrinayaa.

Maxaa uu
samaynayaa Xasan?




Xasan waxa uu nadiifinayaa dariishadaha.

Maxaa uu
samaynayaa aabbe?



Aabbe waxa uu tirinayaa lacag.



Aabbe wax buu cunayaa.

Maxaa uu
samaynayaa aabbe?

Isku aaddi




Isagu wax buu
cunayaa.

Isagu waxa uu
nadiifinayaa
dariishadaha.


Isagu waxa uu
tirinayaa lacag.

Isagu waxa uu
akhrinayaa
buug.

Maxaa ay
samaynaysaa
Faadumo?



Faadumo wax bay akhrineysaa.



Maxaa ay
samaynaysaa
Caasho?

Caasho waxa ay nadiifinaysaa dariishadda.

Maxaa ay
samaynaysaa hooyo?



Hooyo waxa ay tirinaysaa lacag.

Maxaa ay
samaynaysaa hooyo?



Hooyo wax bay cunaysaa.


Qor xarafka



m m m m

magaalo

mindi



Ku qor magaca fallaarta horteeda.



Guuri dabadeedna isku aaddi

ku jira
kor
hoos
u dhow

hoos
ku jira
u dhow
kor

Run ama Been?



Dawacadu waxa ay ku dhex
jirtaa guriga.
Dawacadu waxa ay u dhow
dahay guriga.




Baaldigu waxa uu kor saaran
yahay miiska.
Baaldigu waxa uu hoos yaal
miiska.

Cutubka 4aad



Cutubka 4aad: Dugsiga



Kani waa dugsiga Faadumo.


Sawir dugsiga oo ku qor magacyo qaybihiisa.

Kani waa dugsigeyga.

Isku aaddi



albaab




geed





calan

dariishad



macallin

arday



Fiiри sawirka ku yaal bogga 57.

Immisa albaab ayaa halkaas ah?

Immisa dariishadood ayaa halkaas ah?

Immisa wiil ayaa halkaas ah?

Immisa gabdhood ayaa halkaas ah?




horay



gadaal



dhinac



u dhow

Qor haa ama maya

1. Wiilku ma gadaal taagan yahay calanka?
2. Macallinku ma hor joogaa sabuuradda?
3. Bisaddu ma u dhowdahay dugsiga?
4. Gabadhu ma dhinac taagan tahay geedka?

Akhri oo sawir

Sawir gabar geed dhinac taagan. Sawir wiil calan gadaal ka taagan.

Akhri oo samee

Bannaanka u bax.
Dugsiga hortiisa istaag.
Dhinac istaag calanka.
Wiilal, istaaga geedka agtiisa.
Gabdho, istaaga albaabka agtiisa.

Qor xarafka

h h h h



hal harraadan

Ku buuxi shibbaneyaashan

i

d

g

q

r

h



_ug




_ooyo



_uri



a__al



_ibi




_ati

Ku buuxi shaqalladan

i

o

a



w__n






_i



c__g

Maxaa uu sameeyaa Xasan subax waliba?

U dhig sawirradan sida ay isugu xigaan



Maxaa aad samaysaa subixii?


Isku aaddi weerahan iyo sawirradooda




Waxa uu aadaa dugsiga.



Waa uu kacaa.




Waa uu weyso qaataa.



Waa uu tukadaa.

Qor xarafka

b b b b



baal baranbaro

Bar u yeel midka ka duwan

c c c e c c

e e c e e e

Qor xarafka

e e e e



beero badan



dh dh dh dh



dhir dhaadheer

Maxaa ay sameysaa Faadumo subax waliba?

Akhri sheekada



Subax waliba Faadurno
waxa ay kacdaa aroorta
hore.



Ugu horreyntii waa ay
weyseysataa.



Dabadeed waa ay
tukataa.



Markii ay cabbaar
joogto waa ay
quraacataa.



Dabadeed waxa ay
gashataa dharkeeda
dugsiga.



Ugu dambayntii waxa
ay aadaa dugsiga.

Isku aaddi weerahan iyo sawirka



Faadumo waa ay
weyseysataa.



Faadumo waa ay
kacdaa.




Faadumo waxa
ay aadaa
dugsiga.

Isku aaddi weerahan iyo sawirka

Isagu waa uu tukanayaa.

Iyadu waa ay tukaneysaa.



Isagu waa uu kacayaa.

Iyadu waa ay kacaysaa.

Layliyo naqtiiin ah ee Cutubka 4aad

Isku aaddi oo qor

dh	__indi
q	__uri
n	__uug
g	__in
m	__alin
b	__ ar

Ku buuxi shaqallada

o a i e

g __ l	n __ g
__ do	l __ n
__ lol	d __ lli

Isku aaddi weerahan iyo sawirka

Isagu waxa uu u socdaa dugsiga.


Iyadu waxa ay u socotaa
dugsiga.



Isagu waa uu weyseysanayaa.


Iyadu waa ay weyseysanaysaa.

Cutubka 5aad: Fasalka





Kani waa fasalka Faadumo, Caasho iyo Xasan.
Iyaga sawirka ma ka arki kartaa?
Maxaa ay sameynayaan?

Macallinkaaga magaciis?



Qor xarafka.




Akhri erayadan.



sac


sariir




san

Fiiри ardaydan.

Adigu ma sameyn kartaa?



Akhri erayadan.




gasac



qalin-qori



sabuurad




ulo



buug




kursi



Qor xarafka.

sh sh sh sh



shan shinni

Akhri erayadan.



shaati



shinni

5

shan



shimbir

Akhri weerahan.



Xasan waxa uu sawirayaa guri.



Faarax waxa uu qorayaa magaciis.



Xaalimo waxa ay salaamaysaa hooyadeed.




Caasho waxa ay tirinaysaa ulo.

Akhri oo sawir

Sawir qalin-qori ku dhex jira gasac yar.

Sawir buug kursi kor saaran.

Sawir kursi iyo miis isku dheggan.




Qor xarafka.

k k k k



koob iyo kirli

Akhri erayadan.



buug




kabo



kursi



koob



kirli

kh

Qor harafka.

kh kh kh kh



khamiis


Akhri erayadan.



khamiis



khudrad




khiyaar



khad

Dugsiga




Faadumo iyo Caasho waxa ay u socdaan dugsiga.




Tani waa macallimaddooda.



Maxaa ay sameynaysaa Faadumo?
Waxa ay tirinaysaa ulo.



Maxaa uu sameynayaa Xasan?
Waxa uu qorayaa sheeko.




Tani waa macallimaddooda.
Waxa ay sawiraysaa rati.



Maxaa ay sameynaysaa macallimaddu?
Waxa ay akhrinaysaa sheeko.

Qor xarafka.



Akhri oo sawir.


Sawir qalin-qori buug kor saaran.

Sawir macallin sabuurad ag taagan.


Cutubka 6aad: Tirin



kow



laba



saddex



afar



shan

Akhri oo sawir.

Sawir laba geed.

Sawir afar calan.


Sawir saddex kursi.



Qor xarafka.


y y y y

yambo yar



yaxaas


Tiri.



lix




toddoba




siddeed




sagaal



toban



Qor xarafka.



jiiр jalaqsan

Akhri eraydan.



jid



jiir






juuni



jeeg




Qor xarafka.




Akhri erayadan.




fure



faras



feynuus




Qor xarafka.

t t t t



tuke tuug ah


Akhri erayadan.



tuke




tusbax



toon




timo




Qor xarafka.

X X X X



xarig xooggan

Akhri erayadan.




xarig



xaaqin




xiddig




xoon



Qor xarafka.




Akhri erayadan.




wan



wiil




waraabe




waran


Hamsa



lo'



ri'



go'

Baro shaqallada gaagaaban.

a e i o u


Baro shaqallada dhaadheer.

aa ee ii oo uu

Cutubka 7aad: Xayawaanno

Fiiri xayawaannadan.

Immisa ayaad ka taqaan?




yaxaas



libaax




dhurwaa




bakayle



faras




sac



haramcad



goroyo




dameer




daanyeer




digaagad




maroodi



ri'



rati



jeer

1. Maroodigu waa xayawaan weyn.
2. Digaaggu waa xayawaan yar.
3. Masku waa xayawaan dheer.

Maalmaha toddobaadka

Sabti
Axad
Isniin
Talaado
Arbaco
Khamiis
Jimce

Sabtiga maxaad sameysaa?
Jimcaha maxaad sameysaa?

Annagu Jimcaha ma shaqayno.
Waa maalin cibaado iyo nasasho.

1. Maanta waa Sabti.
2. Berrito waa Axad.
3. Shalay waxa ay ahayd Jimce.

Xarfaha waaweyn


Fiiri erayadan: Isniin, Caasho, Baydhabo
Iyagu waxa ay ka bilowdaan xarfo waaweyn.

Qor magacaaga.
Xaraf weyn ma ka bilowdaa?


Fiiri oo akhri xarfaha yaryar iyo kuwa waaweyn.

B	b	T	t	J	j	X	x
KH	kh	D	d	R	r	S	s
SH	sh	DH	dh	C	c	G	g
F	f	Q	q	K	k	L	l
M	m	N	n	W	w	H	h
Y	y	A	a	E	e	I	i
O	o	U	u				


Qor xarafka weyn.



Bisaddii yarayd



Bisadda yari waxa ay raadinaysaa hooyadeed.




- Adigu ma tahay hooyaday?

- Maya, bisadda yarey.

Anigu waxa aan ahay hal.

Ma ahi hooyadaa.




- Adigu ma tahay hooyaday?


- Maya, bisadda yarey.

Anigu waxa aan ahay maroodi.


Ma ahi hooyadaa.



- Adigu ma tahay hooyaday?
- Maya, bisadda yarey.
Anigu waxa aan ahay haramcad.
Ma ahi hoyadaa.




- Adigu ma tahay hooyaday?
- Maya, bisadda yarey.
Anigu waxa aan ahay mas.
Ma ahi hooyadaa.




- Adigu ma tahay hooyaday?
- Haa, bisadda yarey.
Anigu waxa aan ahay bisad.
Waxa aan ahay hooyadaa.


Sifee xayawaannadan.




Kani waa maroodi.
Isagu waa weyn yahay.



Kani waa doolli.
Isagu waa yar yahay.



Kani waa mas.
Isagu waa dheer yahay.



Kani waa jeer.
Isagu waa buuran yahay.


Baro shaqallada gaagaaban.




rati




dhir




qubo



sac



guri



tuke



dheg




bil




olol


Baro shaqallada dhaadheer.



baal




eey



jiir



koob



buug

Cutubka 8aad: Naqtiin guud

Akhri sheekadan.


Cabdulle waxa uu u socdaa dugsiga.
Waxa uu la kulmay Xasan.
Xasan waa uu ooyayaa.
Jilibkiisa ayaa dhiigaya.
Cabdulle ayaa gacan ku siiyey Xasan in uu dugsiga aado.

Qor jawaabaha.


1. Sheeg magacyada wiilasha.
2. Muxuu Xasan u ooyey?
3. Muxuu Cabdulle sameeyaa?
4. Qor saddex xubnood ee jirkaaga ka mid ah.

Guuri.

Faadumo iyo Caasho
waa fasalka labaad.



1. Waxa yaalla saxamo badan miiska dushiisa.
2. Waxaa yaal afar koob miiska dushiisa.
3. Waxa ay yaallaan miiska korkiisa.
4. Kubbadda waxa ay taal miiska hoostiisa.
5. Waxaa jira ulo badan.




bisad buuran



tuke




jeeg jaalle ah



xoon xanaaqsan



khamiis



doon daloosha



8



rah raka fuula

siddeed


shimbir sharaxyo leh



gabar gaaban

kursi kaban


nacnac



wan weyn

hal habeed leh


yaxaas yar



af


eber

il



olol ogmay

ukun




balanbaalis

balanbaalis baalal leh

eey

jiir



hoon-baro

kalluun

Xarfaha waaweyn

B T J X KH

D R S SH DH

C G F Q K

L M N

W H Y

A E I O U

AA EE II OO UU

